Guddida laanta AKB laanta 1030-5, Bellahøj
email: afdelingsbestyrelsen@vedbellahoj.dk
www.vedbellahoj.dk

Brønshøj 21ka. sebtambar 2010

Nidaamka cusub ee guryaha AKB laanta 1030-5 Bellahøj

Xeerar wadajir loogu noolaanayo.

Heshiiska kirada ee gurigu wuxu ka kooban yahay sharciyo, xeerar iyo qawaaniin la xidhiidha hagaajinta guriga iyo xeerar khuseeya ka wada faaidaysiga waxyaabaha la wadaago, oo ah sharciyada asaasiga ah ee heshiiska u dhexeeya laanta iyo dadka guryaha deggan.

Laantu waxay ka kooban tahay bulsho yar oo kala duwan xagga da'da, iyo asalka bulsheed iyo dhaqameed. Dadka xaafadda deggeni raad ayay ku leeyihiin xeerarka lagu wada noolaanayo, ee laanta ay deggan yihiin. Taas oo ku imanaysa in talooyinka toos loogu soo gudbiyo shirarka laanta, ama in loo diro guddida laanta.

Xeerarka ay wadajir u goaansadaan dadka xaafadda deggeni, waa xeerar ay tahay, inay difaacaan xuquuqda carruurta iyo dadka waawayn, kana dhigaan dhismayaasha, goobaha la wadaago iyo meelaha bannaan qaar xaaladdoodu wanaagsan tahay, oo qarash yar lagu hagaajiyo.

Waalidka xil ayaa ka saaran, inay carruurtooda tusaale fiican u noqdaan. Dhab ahaan dadka xaaafadda deggan ayaa bixiya, , iyadoo kirada loo soo raaciyo, khasaaraha ka dhasha rebshadaha, waxyaabaha aan daruuriga ahayn ee la gaadhsiiyo dhismayaasha, goobaha la wadaago iyo dhirta iwm. Marka la ogaado cidda gaysatay dhibaatada, iyada ayaa bixinaysa.

Waxa intaas dheer, in qofka xaafadda deggeni uu masuul ka yahay, in martidiisu dhawraan xeerarka laanta, markay joogaan aagagga laanta.

Dadka xaafadda deggan waxa ku waajib ah, inay soo gudbiyaan cabashooyinka caqligalka ah, si loo dhawro xasilloonida iyo kala danbaynta laanta. Ku xadgudubka joogtada ah ee xeerarka heshiiska kirada guriga iyo ka tallaabsiga caadooyinka wanaagsan iyo kala danbaynta, waxay horseedi karaan, in qofka laga saaro guriga.

Mishiinnada iyo qalabka farsamada.

Xagga sanqadha, waxa la ogol yahay daloolinta iyo garaacista siliigga iyo gidaarrada:

Maalmaha shaqada	**inta u dhaxaysa 08.00 iyo 19.00 saac**
Sabtida	**inta u dhaxaysa 10.00 iyo 16.00 saac**
Axada iyo fasaxyada	**inta u dhaxaysa 10.00 iyo 16.00 saac**

Lama kulaylin karo, lamana sheelarayn karo mishiinnada.

Brønshøj 21ka. sebtambar 2010

Muusiga, Raadiyaha, TV-ga, qaylada iyo qalaadka.

Caadi ahaan waa la oggol yahay dhegaysiga muusiga, laakiin waa in aad tixgeliso deriska, marka aad daawanayso tv-ga ama dhegaysanayso raadiyaha:

Sameecadaha waa in dhulka wax ka xigaan, haddii ay gidaarada ku dhegsan yihiinna, waa inay gidaarka iyo sameecadaha u dhexeeyaan wax codka hoos u dhiga.

Waa mamnuuc in muusiga la dallaco, iyada oo albaabada iyo daaqaduhu furan yihiin, sida ku xusan xeerka bilayska. Dhawaaqyada kale, ee sida qaylada iyo qalaadkuna, waa in aanay u gudbin deriska hareeraha.

Haddii uu qofku dhiganayo xaflad waqtigeedu dhaafayo 24.00 ka, waa inuu fasax ka qaataa deriska ku naban. Wixii ka danbeeya 24.00 ka waa in la aamusiiyo jabaqda ka baxaysa guriga, si aanay waxba ugu gudbin deriska kale.

Xamaamka iyo musqusha.

Iyadoo la tixgelinayo xasilloonida habeenka, waa in la dhaafo intii suurtagal ah maydhashada saacadaha u dhexeeya min 24.00 ilaa 06.00. Biyaha la isticmaalo waxa lala bixiyaa kirada guriga. Haddii ay liigayaan qasabadaha ama haanta biyuhu, waa in markaas la ogaysiiyaa xafiiska shirkadda. Si fiican u isticmaal biyaha.

Balakoonka.

Lama oggola in balakoonka loo isticmaalo meel dharka lagu qalajiyo ama lagu wadho.

Lama oggola in wax lagu shiisho balakoonka ama luuqyada.

Haddii la isku afgarto xafiiska shirkadda, waa la ogol yahay dayr yar.

In shinbiraha lagu siiyo cunto ama cunto la dhigo balakoonka lama oggola, waayo waxay soo jiidanaysaa jiirka.

Iyadoo la tixgelinayo deriska iyo arrimo kale, lama oggola in buulshinbireed iyo hoy looga dhiso shinbiraha balakoonka, waayo urtooda qadhmuun ayaa horseedi karta caafimaad darro.

Dabjoogta.

Xayawaanka dabjoogta ah lama oggola, in guryaha lagu haysto. Bisadaha waa la ogol yahay, haddii fasax laga soo qaato xafiiska shirkadda.

Guddida laanta AKB laanta 1030-5, Bellahøj
email: afdelingsbestyrelsen@vedbellahoj.dk
www.vedbellahoj.dk

Brønshøj 21ka. sebtambar 2010

Goobaha la wadaago.

Baaskiiladaha, mootooyinka iyo gawaadhida carruurta lama dhigi karo qolalka gudahooda.

Gawaadhida laguma baarkin garayn karo irridaha.

Wiishashka.

Sigaar laguma cabbi karo wiishka iyo marinada sallaanka, in carruurtu ku ciyaarto wiishashkana lama oggola.

Alaabo lama dhigi karo sallaanka, sida uu dhigayo xeerka dabdamisku.

Anteenooyinka/Saxammada

Laantu waxay leedahay anteeno la wadaago. Anteeno/saxan dheeraad waxa la dhigan karaa oo keliya balakoonka gudihiisa, laakiin waa in aan qaybo ka mid ahi debedda uga soo bixin balakoonka.

Haddii la rabo, in meel kale lagu dhejiyo, waa in fasax laga qaato xafiiska shirkadda.

Qashinka.

Waa in qashinka loo xidho si masuuliyadi ku jirto, inta aan godka lagu tuurin.

Qashinka kale ee sida xaashiyaha, quraaradaha iwm, waa in lagu rido kontaynarada loogu talogalay, iyadoo la raacayo xeerarka kala soocidda qashinka.

Jidadka gaadiidka iyo goobaha lagu ciyaaro.

Waa in si xasilloon loo joogaa goobaha la wadaago, oo aan lagu buuqin dadka kale ee xaafadda deggan.

Waxa jira meelo loogu talagalay, inay ku ciyaaraan carruurta yaryari.

Bologyada guryaha waxa laga geli karaa oo keli ah jidadka la maro iyo dhabbayaasha cagta loogu talogalay.

U sheeg carruurta, inay dhawraan goobaha laanta ee lagu beeray ubaxyada, geedaha iyo dhirta.

Mahadsanidin
Guddida laanta